

**BAAQ**

**ISKUDUWAHA ARRIMAHA BINI'AADAMNIMADA EE SOOMAALIYA AYAA KU BAAQAY IN LA ILAALIYO BEDQABKA DADKA RAYIDKA AH KADIB DAD GAARAYA 56,000 OO QOF OO COLAADO AY KU BARAKICIYEEN DEEGAANNADA JUBALAND EE SOOMAALIYA**

*Muqdisho, 3 Maarso 2020* – Sida ay sheegayaan wararka hordhaca ah dad gaaraya 9,000 oo qoys (56,000 oo qof) ayay barakiciyeen colaadaha ka soo cusboonaaday gobolka Gedo ee Dowlad Goboleedka Jubaland laga soo bilaabo horaantii bishii Febraayo ee sannadkan.

“Waa in wax kasta oo suurtagal ah la sameeyaa si loo yareeyo waxyeello ku timaadda dadka rayidka ah ama bubur soo gaara dugsiyada waxbarashada, xarumaha caafimaadka iyo guryaha dadka rayidka ahi degganyihiin,” ayuu yiri Iskuduwaha Arrimaha Bini'aadamnimada ee Soomaaliya, Mr. Adam Abdelmoula. “Waxaan ugu baaqayaa dhammaan kooxaha ay khuseyso iney qaadaan tallaabo kasta si loo ilaaliyo dadka rayidka ah iyo agabkoodaba.”

Iska hor imaadyadan hubeysan ee soo bilowday 7dii Febraayo iyo xiisadahan cirka isku sii shareeray ee dhacay 2dii bisha Maarso waxay sababeen in dad badan oo rayid ah ay ka barakacaan magaalada Belet Xaawo iyo xerada barakacayaasha ee Belet Amin

Dadkan barakacay qaarkood waxay aadeen degmooyinka Doolow, Luuq, goobo isla Belet Xaawo ka tirsan halka dadka qaarkiina ay u firxadeen dhulka miyiga ah. Kooxo dadkan ka mid ah ayaa magaalada ka soo baxay ayagoo isticmaalaya baabuur waaweyn halka qaybo kalana ay cagtooda maalyeen. Waxa kale oo jirta in dad loo diiday iney magaalada ka baxaan ay degeen xaafado magaalada ka tirsan

“Waxaa lagama maarmaan ah in qeybaha ku lugta leh colaadahan ay xil iska saaraan sidii dadka rayidka ahi ayagoo bedqaba uga soo bixi lahaayeen goobaha colaaduhu ku qabsadeen si ay u helaan kaalmooyinka bini'aadamnimo ee ay u baahanyihiin,” ayuu yiri Iskuduwaha Arrimaha Bini'aadamnimada ee Soomaaliya.

Dad lugu qiyaasay 2.6 milyan oo qof ayaa hadda ku barakacsan gudaha Soomaaliya sababo lala xiriirinayo colaadaha waddanka ka socda iyo mashaqooyin ka dhashay isbedellada cimilada. Sannadkii tegay ee 2019 oo kaliya, 190,000 oo qof ayay colaaduhu barakiciyeen. Bishii jannaayo ee sannadkan 2020, dad gaaraya 35,000 oo qof ayaa barakacday, 28,000 oo tiradan ka mid ah waxay guryahooda uga carareen xaalado amni darro.

Soomaaliya waxay u diyaar garoobeysaa sidii ay u dhaqan geli lahayd Heshiiskii Kampala ee Midowga Afrika oo la xiriiray ilaalinta iyo caawinta dadka barakacayaasha ah, heshiiskan oo Madaxweynaha Soomaaliya uu saxiixay 26kii Nofeembar 2019

*Wixii faahfaahin dheeraad ah, kala xiriir:*

Erich Opolot Ogozo, Head of Communications, [ogoso@un.org](mailto:ogoso@un.org), +252 616 548 007

Mursal Ali Ahmed, Public Information Officer, [mursalali@un.org](mailto:mursalali@un.org), +252 619 150 457